



## Tusaalaynta shaqada saxafiyiinteenaa dugsiga sare

Jaraa'iddada waxa dhici karta in la dhigdhigayo waddanka oo dhan, laakiin dugsiyada sare ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, awoodda afraad kaliya ma korayso, laakiin sidoo kale waa bараарaysaa. Qaabab kala duwan -- ta daabacan, ta onlayn ama isku darkooda -- wariyayaashayada wanaagsani waxay ka warramayaan sheekoooyinka ka jira kambasyadooda iyo wixii ka baxsan.

Tusaalaynta qoraalka shaqo ee ay sameeyeen ardayda qaar kamid ah jaraa'idadda iyo majaladaha dugsiyadeena sare.

**Ka socda Caroogga Cleveland:** "Cleveland abaalka waa gudday" waxa qoray James Dryden

Mid kamid ah barnaamijyada khayriga ah ee ugu caansan ee aynu dugsiga ku leenahay waa CHS Gives Back, oo ah mashruuc lacag loogu ururiyo qoysaska Cleveland deggan ee aadka ugu baahan. Hoggaanka fasalka ayaa abaabulay qaadhaan-ururinta oo diyaariiyey kulanka oo isagoo kaashanaya dugsiga, maareeyey inuu ururiyo \$6,446.15, sida ay sheegtag macallinka hoggaanka ah ee la dhaho Susie Brighouse.

"\$1,500 ayaa dib loogu soo celin doona (lacagaha qaabilsiinta) si looga caawiyo muhaajiriinta iyo qaxootiga bulshadeena kharashka caafimaadka iyo guryeynta," ayey dhahday Brighouse. "Inta soo harta waxay toos u tagi doontaa kaalmaynta ardayda CHS iyo qoysaskooda."

[Halkan ka akhri sheeko dhan \(INGIRIISI KALIYA\)](#)

**Ka socda Barta Franklin:** "Sheekadii Archie: Sida wiil wanaagsan uu u caawiyey bulshada oo dhan" waxa qoray Ryan Kovatch

Qaar kamid ah ardayda Franklin, noloshu waxay noqon kartaa mid *dhib ah*. Iyadoo arday tiradoodu sii kordhayso ay soo sheegayaan halgan xagga walaaca ah, waxa iska cad in ururka ardaydu u baahan karaan gacan siin (ama kaalmo). U kaalay Archie, oo ah eyga dabiibista ee dugsiga. Waxa dhici karta inaad aragtay isagoo marmaraya, ama dhex soksocda marinada isagoo la socda cid iyo isagoo dhoollacaddaynaya. Wejigiisa quruxda badan waxa dhici karta inuu dadka soo jiito, laakiin Archie wax ka badan muuqaalkiisa ayuu uga dhigan yahay Franklin.

"Archie waa farxadda qof kasta," ayey dhahday Dana Miller, macallimad Faransiiska dhigta oo joogto Franklin iyo daryeelaha Archie. Sanadkii shanaad ayaa Archie u socda inuu dugsiga joogay. "Maamuleheenii hore, Ms. Valder, ayaa ogaatay inaan haysto iyo inaan geeyo meel lagu daryeelo maalmaha fasaxa toddobaadka. Waxay iga doontay inaan keeno [eyga] xiisad dhakhaatiirteena cilmi-nafsigu ay u qabanayeen ardayda la tacaalaysa walaacyo xaddigoodu sii kordhayo," ayey dhahday Miller. "Taasi waxay keentay inuu la shaqeeyo kooxaha kale ee dugsigeena, sida xiisadda Xirfadaha Aasaasiga ah."

### Halkan ka akhri sheekada oo dhan (INGIRIISI KALIYA)

**Ka Socda Majaladda Grant:** "Dhallintu waxay Kacayaan" waxa qoray Peter Sallinger (qayb kamid ah [Dhibaatada Isbaddalka Cimilada](#) ee majaladda)

Boqol muddaharaadayaal maryo cas ayaa ku qulqulay tiyaatarka Xarunta Buckley ee Jaamacadda Portland. Sidayda oo kale, intooda badan waxay rajaynayeen inay fursad u heli doonaan ay ku gudbiyaan fikradahooga. Waxay yimaadeen iyagoo sita xaashiyo waraaqo ah, kuwaasi oo ay ku qoreen walaacyada, rajooyinka iyo himilooyinka ay qabaan ee mustaqbalka, carada iyo caalwaaga ay ka qaadeen tallaabada gaabiska ah ee dhinaca maamulka magaalada iyo hiigsiyada adduunka ee ay u dhaafi doonaan carruurtoodu kuwa ay sii dhalaan.

Qaarkood waa dhallinyar. Inta ugu badan, taasi waa isbaddal.

Dhacdadu waxay ahayd mid kolba sii xoogaysanaysay muddo bilo ah. Zenith Energy waxay qorshaynaysay (haddana qorshaynaysaa) inay ballaadhisu mugga tareenka saliidda terminaalkeeda Portland. Ballaadhintu waxay kala kulantay qaylodhaan bulshada bii'adda ee Portland, bilo cadaadis jiray kadibna, magaaladu waxay ugu dambayntii oggolaatay inay martigaliso fagaare arrinta kusaabsan bishii Luulyo ee dhawayd."

### Halkan ka akhri sheeko dhan (INGIRIISI KALIYA)

**Ka socda Dastuurka (Madison):** "Johnston wuxuu afka uga galay guul" waxa qoray Macey Pine

Danaynta xagga muusiga ee Catriona (Cat) Johnston waxay ka bilaabantay dugsiga dhexe ee Roseway Heights Middle School halkaasi oo aabeheed muusiga ka dhigi jiray. Had iyo jeer waxa lagu dhiirigelin jiray inay kaqaybqaadato oo ay barato muusiga qoyskeeda dhexdiisa. Wakhtigan la joogana, waxay sheegtay inay ku faraxsan tahay inay ciyaarto muusiga foodhida (trombone) kooxda Honor Band taasi oo fursad u ah inay la ciyaarto ardayda kale ee Portland oo dhan iskaga yimaad.

Markii ayna ku ciyaarayn trombone ama layli guri ka shaqaynayn, waxay ciyaartaa kooxdeeda oo loo yaqaan Cat and Honey. Waxay ciyaraan muusiga rok oo badiil ah iyadoo Cat heesaysa oo una qoraysana heeso kooxdeeda. Cat waxay sheegtay inay ka hesho qorista heesaha sababtoo ah "qorista heesuhu waa qaab fiican oo qalbiga looga nadiifiyo wixii xumaa ee aad maalinta la kulantay, waa sida xasuuusqor." Cat sidoo kale waxay bilawday ciyaarista giitaarka laba sano ka hor waxayna bilawday soosaarista heesaha solo. Waxay rajaynaysaa inay albam ay leedahay soosaarto dhawaan.

### Halkan ka akhri sheeko dhan (INGIRIISI KALIYA)

**Ka socda Cardinal Times:** "Kooxaha isticmaalka mukhaadaraadku waxay sare u qaadaan caafimaadka maskaxda iyo jirka" waxa qoray Gracie Pixton

Arday badan oo Lincoln dhigta waxay la halgamayaan isticmaalka mukhaadaraadka, ama waxay yaqaan qof la halgamaya. Sidoo kale, qaar badan si buuxda uma fahamsana halisaha. Si loola dagaalamo dhibtan loona siiyo ardayda khayraadka ay u baahan yihii, ardayda iyo maamulku waxay sameeyeen laba kooxood kuwaasi oo u go'ay inay ardayda ku baraarjiyaan khataraha daroogada iyo khamriga.

Ta hore waa kooxda wacyigelinta mukhaadaraadka oo toddobaadkii halmar kulma xilliga qadada Isniinaha. Kooxdan waxa maalgaliyey Regence Health. Regence wuxuu siiyey Lincoln deeq uu kaga caawinayo in carruurta yaryar laga wacyigeliyo isticmaalka mukhaadaraadka.

Halkan ka akhri sheeko dhan (INGIRIISI KALIYA)

**Ka socda Horse (majaladda Wilson):** "Baro maamulahaaga cusub" waxa qoray Ginger Felberg

Wilson wuxuu galay sanad kala-guur oo uu hoggaaminayo maamulaheena cusub Filip Hristic. Maamulihii hore ee Roosevelt wuxuu ku faraxsan yahay inuu ugu dambayntii ka shaqaynayo dugsi sare oo bulshadiisu leedahay. Wuxuu rajaynayaa inuu ku soo kordhiyo Wilson mawjad cusub oo isgaarsiin, isla xisaabtan, iyo bulsho. Filashooyin waawayn ayuu u hayaa dugsigeena iyo sanado waayo-aragnimo shakhs iyo xirfadeed, kuwaasi oo uu diyaar u yahay inuu miiska keeno.

Hristic oo ku dhashay Seerbiya, wuxuu ka soo guuray Seerbiya una soo guuray Los Angeles isaga iyo qoyskiisu isagoo fasalka shanaad ah. Sanad kadib qoysku waxay u guureen mar labaad Boston. Hristic wuxuu ku dhammaystay waxbarashadiisii Boston isagoo ka qaatay shahaadada labaad ee falsafadda Kulliyadda Boston iyo shahaadada dokhtareytka oo waxbarashada ah oo hoggaaminta ah oo uu ka qaatay Jaamcadda Harvard University.

"Waxaan kaga qalinjabiye kulliyad digiriiga falsafadda, [oo] maan garanayn waxaan rabo inaan sameeyo," ayuu dhahay Hristic. "Waxaan dareemay sidii aan raadinayey inaan nolosha macnaheega raadiyo. Waxa ka buuxay su'aalahan jiritaanka. Waxan oo dhan ayaa leh?"

Halkan ka akhri sheeko dhan (INGIRIISI KALIYA)